



Summad: MDWAD/567/2021

TR. 08/09/2021

UJEEDO:- SUGID MILKIYAD LABO BOOS OO KU YAAL GOBOLKA MUDUG DEGMADA HOBYO IYO DAMIINU MAAL. Maanta oo ay Taariikhdu tahay 08/09/2021, Waxaa Maxkamadda Hor Yimid Cureeji Shire Maxamuud, oo Wakiil ka ah Dhaxaltooyada Marxuum Shire Maxamuud Maxamed Waxayna u Caddeysay in uu Marxuumka Labo Boos oo Banaan oo Ku lahaa Gobolka Mudug Degmada Hobyo, doonaysana in Mulkiyadda Dhulkaan loo sugo Dhaxaltooyada Marxuumka, waxay Maxkamaddu ka dalabtey in ay markhaatiyaal la timaado, intaas kadib Waxay Maxkamadda hor keentay labada nin ee Soomaaliyeed ee kala ah.

1-) Mahdi Maxamed Cismaan Somali ah, Ku Dhashay Hobyo, Sanadkii 1965, Ina Xaliimo Faarax Geedi, oo Sita Somali Pass.l.r.P00970549.

2-) C/llaahi Cali Axmed, Somali ah, Ku Dhashay Hobyo Sanadkii 1967, Ina Xaliimo Xirsi Faarax, oo sita National ID.NO. 26701013611030.

Waxey Maxkamadda Horteeda Ka Caddeeyeen in Labo Boos oo Banaan oo Ku Yaal Gobolka Mudug Degmada Hobyo 1- Boos Cabirkiisu Dhan yahay 17X15.5-M, Soodintiisuna tahay Waqooyi Waxaa Ka Xiga Xuseen Cawaale Geedi, Koofur Waxaa Ka Xiga isla Dhul uu Lahaa Marxuum Shire Maxamuud Maxamed, Bari Waxaa Ka mara Wado, Galbeed Waxaa Ka mara Wado, 2- Boos Cabirkiisu Dhan yahay 17X12-M, Soodintiisuna tahay Waqooyi Waxaa Ka Xiga isla Dhul uu Lahaa Marxuum Shire Maxamuud Maxamed, Galbeed Waxaa Ka mara Wado, Bari Waxaa Ka Xiga Ina Kuul, Koofurna Waxaa Ka Xiga isla Dhul uu Lahaa Marxuum Shire Maxamuud Maxamed, Waxay kale oo ay Markhaatiyaashu Caddeeyeen in Marxuumku uusan Dhulkaan sife sharci ah Mulkiyaddiisa uga wareegin sida Iibin, Hibeyn, Rahmid IWM, Sidoo kalena Geeridiisa kadib aysan cidna ku tasarufin. Waxay kale oo ay caddeeyeen in Cid kale aysan lawadaagin Mulkiyadda Dhulkaan, Wakiilka Loosuguhuna waa ku ayidey qiraalka maragga.

CADDEYN DAMIINU MAAL.

Waxaa Kaloo Labada Markhaati Maxkamadda Ka Hor Caddeeyeen in ay Damiinu Maal Buuxa ka yihiin Milkiyada Labada Boos ee Sare Ku Xusan, Wixii Burin Sharci ah, ee Ku Yimaada, Sida Hadii ay Dhacdo in Qof Kale uu La Yimaado Dukuminti Sharci ah, oo Sheeganaya Milkiyad.

=SAXIIXA MARKHAATIYAASHA=

1-) Mahdi Maxamed Cismaan

2-) C/llaahi Cali Axmed

= SAXIIXA WAKIILKA DHAXALTOOYADA
Cureeji Shire Maxamuud

SUGITAANKA MAXKAMADDA=

Markii ay Maxkamaddu aragtey Codsiga Wakiilka Dhaxaltooyada. Markay Maxkamaddu dhagaysatey marag furka labada markhaati Waxay Maxkamadda Degmada Wadajir Sugaysaa in Marxuum Shire Maxamuud Maxamed, uu milkiyadiisa iska Lahaa Labada Boos oo Banaan, ee sare ku xusan, Asbaabahaas Kor Ku Xusan Aawadeed, Waxay Maxkamadda Sugaysaa in Marxuum Shire Maxamuud Maxamed, ay Dhaxaltooyadiisa Ku tasarufi karaan, sida iib iyo wixii la mid ah, Waana Sugitaan Mulkiyad Dhul Banaan, iyo Damiinu Maal, Waafaqsana sharciga Islaamka Iyo qaanuunka dalka u degsan, Maxkamadduna waxay ka saxiixdey dhinacyada uu khuseeyey waxayna ku qortey Diiwaanka Guud ee Maxkamadda

=KAALIYAHA MAXKAMADDA=
C/risaaq Cali Cabdi "Caabi"

=ARSOORAHA MAXKAMADDA DEGMADA WADAJIR=
Dr. Axmed Maxamed Cali



JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC


WARAQ/ DA AQOONSIGA

بطاقة الهوية

IDENTITY CARD



L. Qaranka/رقم الهوية/National ID
26701013611030



Magaca/الاسم/Name

ABDULLAHI
ALI AHMED



Taariikhda dhalashada/الميلاد/Birth

01 Jan 1967 HOBYO

Taariikhda la bixiyay/الاصدار/Issue

17 Feb 2014 MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo/الانتهاء/Expiry
16 Feb 2019

Lal/Dheddig/الجنس/Gender

MALE



